Booqashada Guryaha ee Adeegeyaasha Dadweynaha

Isticmaalidda iyo Dhaqaaleynta Qalabka Difaaca Shakhsiga ah (PPE)

6'

PPE laguma beddelan karo kala-fogaanshaha dadka, gacmaha badanaa la dhaqanayo, ama inaan la taaban wejiga, indhaha iyo afka.

PPE oo aad ugu yar meel kasta awgeed, meesha aad ka shaqeyso waxaa laga yaabaa in ay dhaqaalystaan oo PPE loo isticmaalo:

- Keliya marka ay PPE tahay lagama maarmaan.
- Dhaqaaleynta qalabka lagama maarmaanka ah ee PPE iyadoo muddo la xirnaan karo ama marka dib loo isticmaali karo.

Goormaa la Xirtaa PPE:

Xaalad-awgeed	PPE la isticmaalayo
Marka la gelayo guryaha dadka	Maasgarada wejiga ama maro wejiga lagu daboosho haddii maasgaro la waayo, gacmagelisyo
Shaqada awgeed markaad ku dhawaato xataa dad caafimaad qaba	Maasgarada wejiga ama maro wejiga lagu daboosho haddii maasgaro la waayo, gacmagelisyo
Shaqo u baahan dad xanuunsan inaad isku dhawaataan, sida dadka lagu soo xaqiijiyey ama looga shakiyey xanuunka COVID-19	Maasgarada wejiga, gacmageliyo, iyo difaacid dheeraad ah sida caagga wejiga ama ookiyaalaha warshadaha haddii aad weydo Dharka isbitaalka ama xaashi cad oo ah dhar hal mar la isticmaalo

Ogsoonow: Marada wejiga lagu xirto sababteedu ma aha in ay qofka xiran ka difaacdo faayruska, laakiin waxa ay ka hortageysaa in uu qofka xiran dadka u gudbiyo faayruska.

Sida loo Isticmaalo loona Dhaqaaleeyo PPE

Maasgarada wejiga ama dharka la isku qariyo ee uu qofka xanuunsan isku duubo waa in la tuuro, ama haddii ay maro tahay waa in dib kiimiko loogu soo nadiiiyo intaan mar kale la isticmaalin. Haddii aad wakhti dheer marar badan iska bixineyso, dhaq gacmaha ka hor iyo ka dib mar kasta oo iska bixiso maasgarada. Maasgarada aad marar badan xiraneyso dhigo meel nadiif ah, boorso ah xaashi xiran ama caag ay hawo keliya geli karto. Iska tuur boorsada xaashida ah maalin kasta, dhaqo caagga weelka ah. Marada wejiga lagu daboolo dhaqo maalin kasta.

Haddii gacmagelisyadu yar yihiin oo aan laguu hayn kuwa badan oo aad isku beddelato markaad dad guryahoodu ugu tageyso, sida guryo ay dad koox ah ku wada nool yihiin, aalkolo ku nadiifso gacmageliyada ka hor intaadan aadin guri ama meel cusub oo ay dad kale joogaan. Mar kasta waa in aad iska tuurto gacmagelisyada iyo inaad dhaqdo gacmahaaga markaad guri ka soo baxdo oo aad guri kale ku socoto.

Markaad muddo isticmaaleyso ookiyaalaha warshadaha ama cagga difaaca wejiga, ha taaban dushooda ama haddii aad indhaha ku toosineyso waa in aad dhaqato gacmaha. Haddii uu wasakh yeesho waxa aad indhaha ku difaaceyso, ka nadiifi, dhaq, oo aalkolo mari.

Waxyaabo Kale oo Fiican:

- Xusuusnow kala-fogaanshaha dadka waa ugu yaraan lix fiit markii ay suuroobeyso; haddii aysan suuroobeyn qofna wakhti badan ha la joogin
- Gacmaha ku dhaqo saabuun iyo biyo ama aalkolo marso; haddii aad aalkolo isticmaasho ugu horreyn, sida ugu dhakhso badan markaad hesho ugu dhaq saabuun iyo biyo
- Ha iska taaban wejiga, indhaha, iyo afka
- Suxulka ku dabool qufacaaga iyo hindhisadaada

Macluumaadyo Dheeraad ah:

- Talooyinka CDC Ugu Fiican ee Isticmaalidda PPE
- Talooyinka WI DHS ee PPE
- Macluumaadka CDC ee Maryaha Wejiga Lagu Daboolo
- WI DHS Sida loo Sameeyo Maro Aan La Tolin oo Wejiga Lagu Daboosho
- Talooyinka WI Department of Children and Families COVID-19 (COVID-19 ee Waaxda Carruurta iyo Qoysaska WI)
- WI DHS Dhaqaaleynta PPE: Maasgarada Wejiga, Caagga Difaaca Wejiga, iyo Ookiyaalaha Warshadaha
- WI DHS Markaan PPE Aad Loo isticmaaleyn, La-bixinayo, La-xareysanayo, Dib Loo-xiranayo.